

Awood siinta bulshada si sare loogu qaado sidii bulshadu cadaalad u heli lahayd

Janaayo 30, 2024

Deeq hal mar la bixinaayo ayaa lagu taageeri doonaa hindisooyinka bulsheed si loo kordhiyo helista cadaaladda ee dadka reer Alberta.

In arrimaha sharciga ah lagu xaliyo meel ka baxsan nidaamka garsoorka ee soojireenka ah waxay dhinacyada ay khusayso u noqon kartaa mid aan dhib badnayn, raqiis ah kana dhakhsa badan aadista maxkamadda, dad badan oo reer Alberta ahna waxay door bidayaan inay arrimahooda ku xalistaan bulshadooda dhexdeeda badalkii ay maxkamad aadi lahaayeen.

Si ay dadka reer Alberta u siiso goobo dheeri ah oo ay ku xalistaan arrimahooda la xidhiidha danbiyada, qoyska iyo cadaaladda madaniga ah kuwanoo ka baxsan maxkamadda, dowladda Alberta waxay deeq hal mar la bixinaayo oo qaddarkeedu yahay \$1.2 milyan ku maalgalinaysaa si ay u taageerto hindisooyinka wuxtarka leh ee bulshada loogu tala galay kuwaas oo keenaya hab badal u noqon kara nidaamka maxkamadaha ee rasmiga ah. Deeqda Cadaaladda Bulshada ee Alberta (Alberta Community Justice Grant) waxay gacan ka gaysanaysaa kordhinta ka helitaanka cadaaladda goob bulshada dhexdeeda ah taasoo ah mid dhakhsa ah, dhaqan ahaan habboon, ogaal u leh dhibaatooyinka si gaar ahna ugu habboon baahiyaha gaarka ah ee dadka reer Alberta ee nugul.

"Barnaamijyada cadaaladda ee bulshada ku dhex salaysan waa hindise waxter leh oo baddal u ah nidaamka maxkamadaha ee rasmiga ah. Deeqdanu waxay ururada bulshada ka caawin doontaa sahaminta iyo abuurista barnaamijyada cusub si loo siiyo xulashooyin dheeri ah dadka reer Alberta kuwaas oo ay ku helayaan nidaamka cadaaladda caawinayana in maxkamadaha uu cadaadisku ka yaraado."

Mickey Amery, Wasiirka Cadaaladda iyo Qareenka Guud

Cadaaladda bulshadu waxay xubnaha bulshada ka qaybgalinaysaa go'aan qaadashada waxayna ku dhiirigalinaysaa in dhibaatada si wadajir ah loo xaliyo si wax looga qabto dhibaatooyinka sababta u ah khilaafka ayada oo la samaynayo dhexdhedaadin, nabadayn lana adeegsanayo hanaanada kale ee bulshada kuwaas oo gacan ka gaysanaya in khilaafyada lagu xaliyo meel ka baxsan maxkamadda. Waxaa sidoo kale loola dan leeyayah in lagu dhiso bulsho ammaan ah oo xooggan ayada oo kor loo qaadayo ka qaybqalka bulshada, barnaamijyada kahortagga iyo nidaamyada kale ee lagu heli karo caddaalada.

Ururada bulshada ee uqalma iyo kooxaha danaynaya waxay codsan karaan deeq u dhexaysa \$5,000 ilaa \$25,000 si ay uga taageerto barnaamijyada cadaaladda bulshada ee hadda jira ama uga taageerto inay abuuraan hanaan badali kara nidaamka maxkamadaha ee rasmiga ah kaasoo wax ku ool ah. Codsiyada waxaa la qaban doonaa laga bilaabo Janaayo 31 ilaa Febraayo 29.

"Muddo 25 sanno ah, Calgary Youth Justice Society waxay ka caawisay in ka badan 15,000 oo dhalinyaro ah sidii ay uga gudbi lahaayeen xaalado nololeed oo qalafsan iyo mararka qaarkood go'aano aan sax ahayn kuwaas oo ku keenaya inay hiigsan kari waayaan yoolal ay ka midho dhalin karayeen. Maalgashiga sida deeqdaanoo kale ah ee taageeraya fursadaha dadku kaga weecanayaan nidaamka garsoorka ayna ku raadsanayaan xal wax ku ool ah oo bulshada dhexdeeda laga heli karo waa guul u soo hoyatay dhammaanba dadka reer Alberta."

Denise Blair, agaasimaha fulinta, Calgary Youth Justice Society

"Tan iyo 2021, Horn of Africa Educational and Economic Development Society waxay ku dadaalaysay sidii ay adeegyo dhaqankooda ku haboon u siin lahayd bulshadeeda. Deeqda cusub waxay u oggolaan doontaa ururada bulshada inay helaan khayraad badan sida annaga iyadoo ka taageeraysa dadka reer Alberta inay ku xalliyaan arrimaha dhanka sharciga ah meel ka baxsan maxakamadaha danbiyada ayada oo lagu xalinaayo jawi dhaqan ahaan wanaagsan."

Yusuf Ali, guddoomiyaha guddiga, Horn of Africa Educational and Economic Development Society

"Barnaamijka Deeqda Cadaalada Bulshada ee Alberta (Alberta Community Justice Grant) wuxuu markhaati u yahay dadaalka lagu taageerayo sidii qoysasku cadaalad u heli lahaayeen, u dhisi lahaayeen adkaysi una hagaajin lahayeen natijjooyinka ka dhalanaya. Bulshooyinka la shaqaynaya hindisaha Dib Uhaybaynta Nidaamka Cadaaladeed ee Qoysaska reer Alberta (Alberta's Reforming the Family Justice System) waxay sahaminayaan hindisayaal cusub oo isbeddel ka dhalinaya dhinacyo kala duwan si loo yareeyo ku tiirsanaanta hanaanka sharciga ee caqabadaha wata ayada oo la xoojinayo helitaanka kaalmooyinka iyo xirfadaha looga baahan yahay arrimahooda bulsho, xiriir, waalidnimo, dhaqaale iyo caafimaadba. Nidaamkan dib looga fakaray, qoysasku waa ay ku baraari doonaan."

Diana Lowe, la taliyaha dhanka nidaamka cadaaladda, ee Re-imagining Justice

Deeqda halka mar ah waxay taageeri doontaa hindisooyinka cadaaladda bulshada kuwaas oo ay kamid yihiin qiimaynta baahiyaha, ilaha tababarka, kaalmada dhanka teknoolojiyadda ah iyo dadaalada cilmibaarista si loo kordhiyo helitaanka barnaamijyada.

Xaqiiqooyin kooban

- Dadka codsanayaa waa inay daganyihin Alberta kana soo jeedaan kuwa soo socda midkood:
 - ururada aan faa'iido doonka ahayn ee diiwaangashan iyo/ama kuwa khayriga ah ee diiwaangashan oo qiyam wanaagsan leh
 - deegaanada First Nation, Métis Nation of Alberta ama Metis
 - degmooyinka
 - kooxaha bulshada oo leh hay'ad maaliyadeed oo gaar ah
- Shakhsiyadka, hay'adaha tacliinta, ee ururada faa'iido doonka ah, iskaashatada Crown, adeegyada booliiska iyo hay'adaha dowladdu maalgaliso xaq uma lahan.

Macluumaadka la xidhiidha

- [Deeqda Cadaalada Bulshada ee Alberta \(Alberta Community Justice Grant\)](#)
- [Habraacyada Deeqda Cadaalada Bulshada ee Alberta \(Alberta Community Justice Grant\)](#)

Warbaahinta kala duwan

- [Daawo shirka jaraa'id](#)

Su'aalaha warbaahinta

Chinenye Anokwuru

Chinenye.Anokwuru@gov.ab.ca

(780) 720-1915

Xoghayaha Sare ee Saxaafada, Caddaaladda